



GUDNIINKA DHEDDIGA (JARIDDA DHAQAMEED) IYO SHARCIGA AUSTRALIA

the women's
the royal women's hospital
victoria australia

Gudniinka dheddiga, ama 'jaridda dheddiga ee dhaqameed' ayaa ka soo horjeeda sharciga Australia.

Waa maxay gudniinka dheddiga?

Gudniinka dheddiga waa fal dhaqanka dhaqameed. Marmarka qaarkood waxaa sidoo kale loo yaqaan "Jaridda Xubnaha Taranka Dheddigat" (FGC). Waxay ka kooban tahay jarida qaybaha dibedda ah ee agagaarka siilka. Ma jiraan wax faa'iido caafimaad ah oo ku saabsan dhaqankan, waxay dhab ahaantii waxyeeleyn kartaa caafimaadka haweenka ee galmaada iyo taranka.

Muxuu sharcigu ka sheegayaa xirfadan?

Waxay ka soo horjeedaa sharciga ee gudniinka dheddiga in lagu sameeyo carruurta, gabdhaha ama haweenka.

Hawlaho soo socdaa waa sharci darro marka aysan dhaqtar sameynin sababo caafimaad awgood:

- Jarista ama goynta qayb ka mid ah xubinta taranka dheddiga (excision), oo ay ku jiraan kintirka iyo labiyaha
- tolidda qaybta taranka dheddiga (tolliinka)
- qalliin kasta oo loo yareynayo ama loo xirayo afka siilka
- jarista kintirka ama qeyb ka mid ah kintirka (clitoridectomy)
- Waxyeellaynta ama burburinta xubnaha taranka Sidoo kale waa ka sharci darro Victoria:
- uqaadida dheddiga meel kasta oo Australia ah ama wadan kale si loo gudo
- ku caawinta qof inuu sameeyo gudniinka dheddiga
- raadso qof kale oo sameeyo gudniinka dheddiga

Xitaa haddii qofka dumarka ah ay ogolaato in gudniinka la sameeyo, ama waalidkeedba fasax siyo, weli waa sharci daro

Maxaa dhacaya haddii qof uu jabiyo sharciga?

Qofku wuxuu jebinayaa sharciga haddii:

- usameeyo qalliinka
- uu ku caawiyo qof inuu sameeyo qalliinka
- uu raadsho qof inuu sameeyo qalliinka.

Ciqaabtu waa xabsi ilaa 15 sano ah halkan Victoria.

Ma jiraan habab qalliin oo la oggol yahay?

Hababka qalliinka ee ku saabsan xubnaha taranka dumarka waxaa sameeyya dhaqtarka caafimaad markii:

- Qalliinku uu lagama maarmaan u yahay sababaha caafimaadka
- ay lagama maarmaan u tahay inta lagu jiro foosha ama isla markiiba dhalashada ka dib
- ay tahay qalliin dib-u-habeynta galmaada (isbeddelka galmaada)

Haweenay dib maloo toli karaa (dib-u-dhac) dhalmada ka dib ama ka dib nooc kale oo qalliinka hababka dhalmada ah?

Maya. Haweeney looma ogola inay dib isutosho taasoo loogu talagalay in la yareeyo ama xiro afka siilka sababo aan caafimaad ahayn. Hase ahaatee tolliinka, waxaa laga yaabaa in loo baahan yahay ka dib dhalidda haddii uu jiro jeexitaan ama jaridda qaliinka. Tan waxaa sameeyya dhaqtar ama umulisada isla markiiba dhalidda kadib.

Yaa uga warbixinaya gudniinka dheddiga (goynta dhaqameed) ee ilmaha ee maamulka?

Halkan Victoria, gudniinka dheddiga waa sharci darro waxaana loo tixgeliyaa xadgudubka ilmaha haddii lagu sameeyo ilmo da'disu ka yar tahay 18 sano. Tan waxay ka dhigan tahay in dadka xirfadaha ee la shaqeeyaa carruurta waa inay soo wargaliyaan Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha haddii ay tuhunsan yihiin in ilmaha la guday. Dadkaas waxaa ka mid ah: dhaqaatiirta, kalkaaliyayaasha, bareyaasha, shaqaalaha childcareka, iyo booliska, si kastaba ha ahaatee qof kasta ayaa usoo sheegi kara Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada dadweynaha. (*Sharciga Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska 2005 qaybta 162*) (*Children, Youth and Families Act 2005 section 162*)

Wixii macluumaad dheeraad ah

Shaqaalaha FARREP ee Haweenka ayaa la heli karaa Isniinta ilaa Jimcaha, 9ka subaxnimo illaa 5ta galabnimo

T: (03) 8345 3058

E: farrep.program@thewomens.org.au

Waxaad sidoo kale kala hadli kartaa shaqaalaha FARREP ee xarunta caafimaadka bulshada ee deegaankaaga.

Ka raadi website-keena internetka wixii macluumaad dheeraad ah:

www.thewomens.org.au

Tixraacyada Sharciga

Sharciga Victoria

- Xeerarka Dambiyada 1958 (Vic) s32 – 34A (Crimes Act 1958 (Vic) s32 – 34A)
- Sharciga Carruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska 2005 (Vic) s162, s163, s182, s184 (Children, Youth and Families Act 2005 (Vic) s162, s163, s182, s184)

Sharciyada kale ee Dowlad-goboleedyada Australia

- Xeerarka Dambiyada 1900 (ACT) s73-s77 (Crimes Act 1900 (ACT) s73-s77)
- Xeerarka Dambiyada 1900 (NSW) s. 45, s45A (Crimes Act 1900 (NSW) s. 45, s45A)
- Xeerka Koodka Dambiyada (NT) Qaybta 4A (Criminal Code Act (NT) Division 4A)
- Xeerka Koodka Dambiyada 1899 (Qld) 323A, 323B (Criminal Code Act 1899 (Qld) 323A, 323B)
- Xeerka Isugaynta Sharciga Dambiyada 1935 (SA) Division 8 (Criminal Law Consolidation Act 1935 (SA) Division 8)
- Xeerka Koodka Dambiyada 1924 (Tas) s178A (Criminal Code Act 1924 (Tas) s178A)
- Xeerka Ururinta Xeerka Koodka Dambiyada 1913 (WA) s306 (Criminal Code Act Compilation Act 1913 (WA) s306)